
# Qorshayaasha Shaqada

Employment Plans

## Siddee ayuu barnaamijka SSB ama kan VRS iiga caawin karaa aniga shaqo helid?

Hadii aad xaq u leedahay adeegyada Tababarka Xirfadaha (VRS) ama Adeegyada Gobolka ee Indhoolayaasha (SSB), adiga iyo la taliyahaaga waxa aad go'aansan kartaan in qiimeyn loo baahan yahay. Qiimeynta waxaa loo isticmaali in lagu ogaado waxa aad ku roon tahay, mudnaanahaaga, xiisahaaga iyo baahidaada si aad u shaqeysato. Qiimeyntu waxa ay kaa caawin inaad sameysato qorshe hawleed la yiraa Qorshaha Shaqada (EP). Marmarka qaarkoodna waxaa la yiraa Qorshaha Shakhsiyanka ah ee Shaqada (IPE).

## Waa maxay Qorshaha Shaqadu (EP)?




EP gu waa qorshe qoran oo cadeeya nooca shaqada ah ee aad doonayso inaad hesho talaabooyinka taxanaha ah ee aad u baahan tahay inaad qaado si aad u hesho shaqada rabtid.

Waxaa jira 3 qaab oo lagu sameysan karo EP:

1. Kaligaa mid aad sameysanayso
2. Mid aad sameysanyo iyadoo uu ku caawinayo la taliyahaaga xirfadeyntu, ama
3. Mid aad sameynayso iyadoo uu ku caawinayo qof doonaya inuu ku caawiyo

La taliyahaagu waa khasab inuu ku siiyo akhbaar qoraal ah oo sharaxda caawimaada aad heli karto ee ku saabsan qorida (EP) ga. Sidoo kale waa inay jirtaa tilmaam buuxda oo ku saabsan waxyaabaha ay tahay inay ku jiraan (EP). Hadi aad u baahan tahay akhbaarta oo qaab kale ah iyadoo sababta baahidaasina ay tahay naafanimadaada, waa inay hubiyaan inaad hesho iyana.

Ma aad heli kartid inta badan adeegyada VRS ama SSB ilaa iyo inta qorshaha EP ga laga dhamaynayo lagana saxiixayo. kolka, mar walba oo aad degdeg u soo samayso waa mar walba oo aad adeegyada degdeg u heli kartid.

## Qorida Qorshahaaga Shaqada

EP gu inta badan waxa uu leeyahay akhbaaran soo socota:

- hadafyadaada shaqo iyo kolka aad gaari doonto

- adeegyada cayiman oo aad u baahan tahay si aad u gaarto hadafyadaada shaqo. Adeeg walba oo la qoray waa khasab inuu muhiim ku yahay inaad shaqo hesho aadna sii wadato, oo ay ku jiraan adeeg bixiyeyaasha, waqtiyada la bilaabayo iyo akhbaar ku saaban meesha lacagta loo baahan yahay ay ka imaanayso.

- sida adiga iyo la taliyahaagu aad ku ogaanaysaan inaad horukac ka samaynaysaan dhanka hadafydaada shaqada

- adeegyo iyo manfacyo barnaamijyo kale oo kaa caawin kara gaarida hadafyadaada

- waajibaadka saaran VRS ama SSB

- waajibaadka adiga ku saaran iyo

- Saxiixa ansixinta ee adiga iyo la taliyahaaga



**Cayin warkaaga!** EP gu waa inuu si fiican u cayinaadaa. Si kale hadii aan u iraa, hubi in hadafyadaada shaqo ay faahfaahsan yihiin ee aysan iska ahayn wax guud uun. Ogow adeegyada iyo qalabka aad u baahan tahay si aad u gaarto hadafyadaada shaqo. Hubi in EP gaaga ay ka muuqato waxa aad roon tahay munaanahaaga, walaacaga iyo awoodaada iyo xaddidaadahaag.

Hubi inaad fahamto aadna ogolaato waxyaabaha ku jira EP ga. Tan waxa ay ka dhigi arrinta mid ay u badan tahay inaad ku najaxdo.

Hadii aadan aqoon adeegyada iyo qalabka aad u baahan tahay ama hadii adiga iyo la taliyahagu aad ku heshiin waydaan waxa aad u baahan tahay, VRS ama SSB waxaa dhici karta inay tiraa waa in qof dhexdhexaad ahi uu qiimeeyo baahidaada. Qofkan dhexdhexaadka ahi waa inuu noqdaa qof yaqaan baahida dadka naafada ah ee sidaada oo kale ah.

EP gaagu waa khasab inuu ladaaho akhbaar ku saabsan xaquuqdaada, waxa aad sameyn karto hadii uu dhib ku haysto, iyo akhaar ku saabsan Barnaamijka Gargaarka Macmilka (CAP).

Adiga iyo la tailyahaagu waa khasab inaad isku **raacdaan** **dhamaan qaybaha** EP ga si uu u sharciyeysnaado. Labadiinaba adiga iyo la taliyaha waa khasab inaad saxiixdaan EP ga. Saxiixida EP macnaheedu waa in labadiinu aad isu raacsan tihiin wax kasta oo ku jira Qorshaha Shaqada.

Xasuusnow, VRS iyo SSB kuma siin karaan adeegyo ilaa iyo inta aad ka helayso EP sharciyeysan. EP gaagu waa talaabo lama huraan ku ah helida adeegyada tababarada xirfadaha ee aad u baahan tahay si aad shaqo u hesho una sii wadato shaqadaa.

## Adeegyada la mid ah iyo Manfacyada

Ka hor inta aan qaar adeegyada ka mid ah la gelin EP gaaga, la taliyahaagu waa khasab inuu eego inay jiraan ilo kale oo bixin kara adeega. Adeegyadaa waxaa la yiraa “adeegyada la midka ah iyo manfacyada.” Waa adeegyo ama manfacyo:

- ay bixin karaan, kuli ama qayb, hay’ado kale oo dowlada dhexe ah, gobolka, ama deegaanka hoose ah ama manfacyada shaqaalaha

- la heli karo isla waqtiga aad u baahan tahay iyo


- lana mid ah adeegyada aad ka heli lahayd VRS ama SSB

**Laakiin la taliyahaagu** khasab kuma aha inuu raaciyo adeeg la mid ah ama manfacyo hadii taasi macnaheedu yahay inay dib u dhigayso:

- horukacaaga dhanka gaarida natiijooyinka shaqo
- shaqo ku meelayn degdeg ah ama
- **siinta adeegyada kolka ay ku haysato khatar cadiim ah oo caafimaad**

## Ma khasab baa inaad bixiyo adeegyada lagu xusay EP gayga?

VRS ama SSB waxa ay eegtaa xaalaada dhaqaale. Iyadoo hadba ku xiran xaaladaada dhaqaale, waxaa dhici karta inaad caawiso bixinta kharaska qaar ka mid ah adeegyada. Qaybnta ay tahay inaad bixiso waxaa la yiraa “ka qaybgalka dhaqaalaha ee macmilka (CFP).”



LAAKIIN adeegyadan soo socda waa la heli kartaa iyagoo cid walba lacag la’aan u ah, wax kasta xaaladooda dhaqaale ha noqotee:

- qiimeyno si loo go’aansado xaq u yeeladka iyo baahida tababarada xirfadaha

- la talin, hagid iyo u gudbin adeegyo

- shaqo raadin iyo adeegyada meelaynta

- adeegyada gargaarka shakhsiyanka ah

- adeegyada turjubaanka ee naafada la xiriira, adeegyada akhriyaha ama adeegyada kale ee aad u baahan tahay si aad u awoodo inaad isticmaasho adeegyada xirfadeynta.

**Hadii aad xaq u leedahay manfacyada sooshal sakuuratiga (Social Security), ma aha inaad bixiso qaybna adeegyada.**

## Saxiixida Qorshahaaga Shaqada

Kolka EP ga la dhameeyo, waxaad u baahan tahay inaad saxiixo qorshaha qoran. Hadii aadan ogolayn EP ga ha saxiixin. VRS iyo SSB waa khasab inay nuqul kaa siiyaan EP ga isagoo ah af aad fahmi kartid. EP waa khasab in dib loo eego lana cusboonaysiiyo sannad walba.

Hadii u jiro dhib idiin dhexeeya adiga la taliyaahaga kolka la sameynaya EP ga, la xiriir Baraamijka Gargaarka Macmilka (CAP) si aad caawimaad uga hesho.

## Mashruuca Gargaarka Macmilka (CAP)

Hadii aad tahay macmil ama codsade adeegyada hay'adaha VRS ama SSB, waxa aad wici kartaa Mashruuca Gargaarka Macmilka (CAP) si aad caawimaad uga hesho, hadii aad qabto su'aalo,walaac, ama ashtako ku saabsan adeegyada tababarada xirfadaha. Hay'ada (CAP) **ma bixiso** adeegyo tababaro xirfadeed ah oo toos ah, sida, tacliin, tababarid, ama qalab. Eeg warqadayada xiga aruursan ee *Mashruuca Gargaarka Macmilka.*



Wixii akhbaar ah ee kale ee ku saabsan (CAP) ama sida loo codsado adeegyada (CAP), ka wac:

- (612) 334-5970 (agagaarka beledyada)
- 1-800-292-4150 (gobolka oo dhan)

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**